



The Environmental Justice Fund 2019

A program of the City of Seattle. Administered by The Bullitt Foundation.

Waxaan ku faraxsanahay in aan ku dhawaaqo Environmental Justice Fund (Sanduuqa Dhaqaalaha Caddaaladda Deegaanka), oo ah fursad deeq cusub oo loogu talagalay mashaariicda ay bulshadu hoggaamineyso oo wanaajinaya xaaladaha deegaanka kana jawaaba saameynta isbeddelka cimilada.

Sanduuqa Dhaqaalaha waxaa ka mid ahaa dadka soo abaabulay Environmental Justice Committee (Guddiga Caddaaladda Deegaanka) – 12 qof oo ku leh bulshada xidido qotodheer oo si dhow ugala shaqeeya bulshooyinka arrimaha ku saabsan caddaalada deegaanka - iyaga oo taageero ka heleya Seattle Office of Sustainability & Environment (Xafiiska Joogtaynta & Deegaanka ee Seattle).

Sanduuqa Daqaalaha wuxuu aqoonsanyahay in xalka ugu habboon ee deegaanka iyo cimilada ay ka yimaado bulshada lafteeda ayna xubnaha bulshadu ku jiraan booska ugu wanaagsan ee lagu nashqadaynayo oo lagu fulinayo mashaariicda ay ka mid yihiin bulshada, dhaqanka, dabiiciga, qoyska, caafimaadka, cuntada iyo/ama waxbarashada.

Bulshooyinka midabka leh iyo hay'adaha ay hormuudka u yihiin dadyowga midabka leh waxaa lagu casumayaa in ay soo gudbiyaan soo-jeedinta mashaariicda. Mashaariicda waa in ay hoggaamiyaan oo ay ka faa'iideystaan dadka ay aadka u saameeyeen arrimahan: bulshooyinka midabka leh, muhaajiriinta, qaxootiga iyo dadka Dhaladka ah - oo ay ku jiraan dadka dakhligoodu hooseeyo, dhalinyarada iyo waayeelka - kuwaas oo ku nool, ka shaqeeya, ku cibaadaysta, kuna dhex cayaara City of Seattle (Magaalada Seattle).

Waxaa jira \$200,000 maalgelin ah oo laga heli karo Magaalada Seattle, waxaana maamulaya deeqda Bullitt Foundation. Abaalmarinta deeqda ugu badan waxay noqon doontaa \$40,000. Mashaariicda waxay bilaaban doonaan Janaayo 2020 waana in la dhammeeyo Juun 2021. Arajiiya waxaa las soo-gudbinayaa ugu dambeys Isniinta, September 16, 2019 4:00 galabnimo.

Waxaa la bixin donaa kulamo akhbareedada si loo codsadaayaasha looga caawino nidaamka marxaladaha dalabka. Waxii. Faahfaahino dheeraad ah waxaad ka heleysaa onlaynka seattle.gov/environment/ejfund.

Su'aalo? Fadlan u dir iimayl: ejfrfp@gmail.com

Fadlan la soco in dhammaan dalabka iyo qoraalada agab soojeedinta lagu soo gubin karo luuqada Ingriiska oo keli ah.